



STAY SAFE MN

DAAWADA KOFID-19

Difaaca Jirka Monoclonal

Daawooyinka difaacyada jirka monoclonal waxay caawin karaan qofka jira 12 sano iyo ka weyn si ay ula dagaalaan jirada. Difaacyada jirka monoclonal waa faleebo ama cirbad.

Haddii aad la jirantahay KOFID-19 daawooyinka waxay joojin karaan inaad sii bukooto waxayna soo gaabin karan waqtiga xanuunkaaga. Waad heli kartaa daawada haddii:

- ✓ Aad qabtid KOFID-19.
- ✓ Calaamadaha bilaabmeen wax ka yar todobo maalmood ka hor.
- ✓ Isbitaal aadan galin.

Inta badan daawooyinka KOFID-19 waa lacag la'aan laakiin waxaa jiri kara kharash iyo khidmada kale. Haddaad haysatid caymis warbixintaas sheeg markaad daawada qaadnaysid. Haddaad haysan caymis waydii daryeel-bixiyaha caafimaad ama farmashiyaha kharashka.

Booqo [Ikhtiyaarada Daaweynta COVID-19 \(www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/meds.html\)](http://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/meds.html), ama la hadal dhakhtarkaaga ama daryeel-bixiye caafimaad oo kale si aad u ogaato inaad isticmaali karto daawadan iyo si aad u hesho rug caafimaad.

Si aad u hesho macluumaad badan, waxaad ka wici kartaa Khadka Guud ee KOFID-19 lambarkaan: 833-431-2053, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 7 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha, iyo laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Sabti kasta.

